


# Wiilkii kabo tolaha

- Sheeko ka timid Booland



## Skomakersønnen

- En polsk fortelling

Bari baa waxaa jiray wiil aabihiis la noolaa,  
aabihiina ahaa kabo tole. Aabuhu wuxuu ahaa  
mid cadho badan oo markasta wiilka ku  
qayliya. Maalin maalmaha ka mid ah ayaa  
aabihii aad u xanaaqay oo wiilkiisii ka saaray  
gurigga. Wiilkiina wuxuu kaliya qaatay xoogaa  
rooti ah, sidaas baanu ku baxay.

Det var en gang en gutt som bodde sammen med sin far  
som var skomaker. Faren var en sinnatagg og kjeftet på  
gutten hele tida. En dag ble faren så sint, at han kastet ut  
gutten sin hjemmefra.



Wuu socday wuuna socday ilaa uu kayn ka yimid. Wuxuu  
dhex maray beeraha iyo seeraha, ugu danbaytiina aad  
buu u daalay oo wuu jiifsaday si uu u nasto.

Gutten fikk bare med seg litt brød, og dro sin vei. Han gikk og gikk,  
helt til han kom til en skog.

Han gikk gjennom busker og kratt, og til slutt ble han så sliten at han  
la seg ned for å hvile.





Si lama filaan ah ayuu u arkay qudhaanjo badan oo dhinac walba u ordaysa, is jiidhay, khalkhal badana abuurta. "Maxaa dhacay?" ayuu ku fekeray wiilki.

Plutselig så han masse maur som løp rundt til alle kanter, de krasjet med hverandre og det var virkelig kaos. «Hva har skjedd?» tenkte gutten.

”Haa!” wiilkii wuxuu arkay in duduntii  
qudhaanjadu burburay. ” Waan  
ogahay siday tahay markaad  
gurigaagga weydo”, ayuu yidhi wiilkii  
inta uu ciidii dib ugu celiyey meeshii

«Aha!» Gutten så at det var en murtue  
som var ødelagt. «Jeg vet hvordan det er  
å miste hjemmet sitt,» sa gutten, og feiet  
jorda tilbake på plass.

Deretter tok han en håndfull  
med brødsmuler ut av lomma og  
strødde det rundt til maurene.





Sacab muggiis oo rooti ah ayuu jeebkiisa uga soo saaray wuxuuna ku saydhiyey agagaarka qudhaanjada. Intay quraanjadu cunaysay rootigiina, wuu seexday wiilkii.

Mens maurene spiste brød, la gutten seg ned og sovnet.

Maalintii ku xigtay ayuu wiilkii toosay oo u diyaar garoobay inuu baxo. Kadib qudhaanjadii ayaa ku soo ururtay oo ku tidhi:

"Waad ku mahadsan tahay inaad tahay qof naxariis badan oo toosan, weligeen ku ilaabi mayno, waxaanan ballanqaadayaa inaan kuu nimaadno oo aan ku caawino."

"Sidee ayaad ii caawinaysaan?" Ayuu yidhi wiilkii, isagoo dhoola cadeynaya oo wadadiisa ku sii socday.

Neste dag våknet gutten og gjorde seg klar til å dra videre.

Da samlet maurene seg rundt ham og sa: «*Takk for at du var snill og grei, vi skal aldri glemme deg.*

*Vi lover å komme og hjelpe deg».* «*Hvordan skal dere hjelpe meg?»* sa gutten smilende og fortsatte på sin vei.






Wuxuu dhex maray beeraha iyo seeraha, illaa uu ka gaadhay webi ay ka buuxaan kalluun - kalluun dahab ah!

Han gikk gjennom skog og mark, helt til han kom til en elv - full av fisk - gullfisk!



Markii kalluunkiii dahabka ahaa arkeen, aad bay u baqeen maxaa yeelay waxay u maleeyeen in wiilku qabanayo oo uu cunayo. Markaa waxay bilaabeen inay si dhakhso ah u dabaashaan. "Waan ogahay sida ay tahay inaad ka tagto gurigaagga, ayuu yiri wiilkii. Markaasuu waxoogaa rooti ah oo jeebkiisa ku jiray kala soo baxay oo hoos ugu tuuray biyihii.





Da gullfiskene så gutten, ble de så redde. De trodde at gutten skulle fange dem og spise dem opp. Dermed begynte de å svømme fort av sted. «Jeg vet hvordan det er å måtte forlate sitt hjem,» sa gutten. Dermed tok han en håndfull med brødsmuler ut av lomma si og kastet det ned i vannet.

Kalluunkii ayaa uriyay rootigii, way soo jeesteen oo si deg deg ah ayey dib ugu soo dabaasheen iyagoo isku dhacayay.

Kadibna waxay bilaabeen inay ku dagaalamaan cuntadii, waxayna u cuneen si hunguri ku jiro.

Fiskene luktet brødet, snudde seg og svømte fort tilbake mens de krasjet i hverandre. De begynte å sloss om maten og spiste grådig opp alt sammen.






Wiilkii wuu dhoola cadeeyay, ka dibna wuu jiifsaday oo wuu seexday.

Gutten smilte, la seg ned og sovnet.



Maalintii ku xigtay ayuu wiilkii toosay oo u diyaar garoobay inuu baxo.


Neste dag våknet gutten og gjorde seg klar til å dra videre.



Kolkaasaa kalluunkii madaxyadoodii biyaha kala soo bexeen oo yidhaahdeen: "Waad ku mahadsan tahay inaad tahay qof naxariis badan oo toosan, weligeen ku ilaabi mayno, waxaanan ballanqaadaynaa inaan kuu nimaadono oo aan ku caawino." "kkk, sidee ayaad ii caawinaysaan?" ayuu yiri wiilkii jidkiisii ayuuna ku sii socday.

Da stakk fiskene hodene opp av vannet og sa: «Takk for at du var snill og grei, vi skal aldri glemme deg. Vi lover å komme og hjelpe deg». «He, he, hvordan skal dere hjelpe meg?» sa gutten og fortsatte på sin vei.

Wuxuu dhex maray beeraha iyo  
seeraha, illaa uu ka gaadhay  
geed weyn. Markaas aad u  
daalay oo wuxuu jiifsaday  
geedka hoostiisa si uu u seexdo.



Skomakersønnen gikk gjennom  
mark og eng, helt til han kom til  
et stort tre. Da var han så sliten  
at han la seg under treet for å  
sove.

"Bzzzzzzz," ayuu si lama filaan ah u maqlay. Intuu kacay ayuu hareeraha fiiriyey. Madaxiisa korkiisa Shinii ayaa ku wareegaysay dhan walba. "Maxaa dhacay," ayuu ku fekeray wiilkii. "aah!" waxa uu ogaaday in geedka laga soo saaray sanduuqii malabka shinnida iyo in qolfihii malabka hareeraha lagu tuuray " Waan ogahay siday tahay markaad gurigaagga weydo," ayuu yiri wiilkii inta uu qolfihii dib isuge celiyey.

«Bzzzzzzz,» hørte han plutselig. Han reiste seg og så seg rundt. Over hodet hans virvlet det mange bier til alle kanter.


«Hva har skjedd?» tenkte han.

«Aha!» Han la merke til noen bikuber som var dratt ut av trehuler, og bivoks som hadde blitt kastet rundt omkring.

«Jeg vet hvordan det er å miste et hjem,» sa gutten og satte kubene sammen igjen. Nå kunne biene samle honning og legge egg igjen.



Hadda waxaa u suura galay shinnidii  
inay dib u ururiyaan malabkii iyo  
ukuntiiba. Ka dib wuxuu soo saaray  
rootigii ugu danbeeyey ee uu ka  
hadhay jeebkiisa, wuuna quudiyay  
shinnidii.



Så tok han frem de siste  
brødsmulene som han fant  
nedi lomma, og matet biene.


Intaas ka dib si  
dheer ayuu u  
seexday

Deretter sovnet han.



Maalintii xigtay wiilkii wuu kacay oo wuxuu dareemay inuu aad u baahan yahay. Rooti kalena uma hadhin. "Waa inaan tago oo raadsadaa waxaan cuno," ayuu yiri. Markaasay shinnidii madixiisa ku wareegeen oo ku yidhaahdeen: "Waad ku mahadsan tahay inaad tahay qof naxariis badan oo toosan, weligeen ku ilaabi mayno, waxaanan ballanqaadaynaa inaan kuu nimaadno oo aan ku caawino." "sidee baad ii caawinaysaan?" ayuu yidhi wiilkii isaga oo ku sii socda jidkiisii.

Neste dag sto gutten opp og merket at han var kjempesulten. Han hadde ikke flere brødsmuler igjen. «Jeg må dra og finne noe mat,» sa han. Da slo biene en sirkel rundt hodet hans og sa: «*Takk for at du var snill og grei, vi skal aldri glemme deg. Vi lover å komme og hjelpe deg*». «*Hvordan skal dere hjelpe meg?*» sa gutten og fortsatte på sin vei.



Wuxuu dhex maray  
beeraha iyo seeraha,  
illaa uu ka gaadhay  
magaalo. Magaaladda  
waxaa ku yaalay guryo  
badan. Guraha  
dhexdoodana waxaa ku  
yaalay qasri. Qasriga  
dhexdiisana waxa ku  
yaalay minaarad, aad u  
dheer!



Han gikk gjennom mark og  
eng, helt til han kom til en  
by. I byen var det mange  
hus.

Midt mellom husene var  
det et slott. I midten av  
slottet var det et tårn.





Minaarada xageeda sare waxaa ku yaalay qol, qolkaasna waxaa ku jiray amiiradd quruxbadan.

Tårnet var kjempehøyt og oppe i tårnet var det et rom.

Amiiraddu waxay ku xidhnayd qolka,  
furaahiina waa la waayey. Qofka ku  
guuleystey inuu helo furaha qolkeeda,  
wuxuu guursanyaa amiiradda. ayey  
go'aansatay hooyadeed.

Inni rommet var det en vakker prinsesse. Hun  
var låst inne og nøkkelen var borte. Den som  
klarer å finne nøkkelen til rommet hennes,  
skulle få gifte seg med henne, hadde moren  
hennes sagt.





Wiilkii kabo tolaha ayaa go'aansaday inuu fursadaas tijaabiyo. Sidaa daraadeed wuxuu aaday qalcaddii, wuxuuna garaacay albaabkii. Amiiradda hooyadeed ayaa albaabka ka furtay.

Skomakergutten ville ta sjansen. Derfor dro han til slottet og banket på.

"Ma waxaad u timid inaad guursato amiiradda?" ayey waydiisay saaxiraddii. "Haa, ayuu ku jawaabay wiilkii kabo tolohu isagoo gariiraya." Waa inaad qabataa saddex hawlood ", ayey tidhi saaxiradii. "Oo haddii aad samayn kari waydo midkood, qoorta ayaan ku jebinayaa!" "Ii dhiib howlaha," ayuu yiri wiilkii kabo tolohu isagoo baqaya.

Moren til prinsessa åpnet døra.

Hun hadde store ører, krokete nese, svart stor hatt på hodet og en feiekost mellom bena.

Hun var rett og slett en heks!



"Ma waxaad u timid inaad guursato amiiradda?" ayey waydiisay saaxiraddii. "Haa, ayuu ku jawaabay wiilkii kabo tolohu isagoo gariiraya." Waa inaad qabataa saddex hawlood ", ayey tidhi saaxiradii. "Oo haddii aad samayn kari waydo midkood, qoorta ayaan ku jebinayaa!" "Ii dhiib howlaha," ayuu yiri wiilkii kabo tolohu isagoo baqaya.


«Er du her for å gifte deg med prinsessa?» spurte hekse.

«Ja,» svarte Skomakergutten skjelvende.

«Da må du greie å gjøre tre oppgaver,» sa hekse.

«Hvis du ikke klarer en av dem, vil jeg vri om halsen på deg!»

«Gi meg oppgavene,» sa Skomakergutten redd.



Ka dib waxay u dhiibtay ciid badan, oo ay ku jiraan iniinyo ubax oo aad u farobadan. "Waa inaad kala soocdaa ciidda iyo iniinyahaa ubaxa". ayey tidhi sixirooladii "Hadaadand ka gaadhsiin inta aanay qorraxdu dhicin, qoorta ayaan ku jebinayaa!"

Da tømte heksa en haug med sand og masse bittesmå valmuefrø foran ham.

«Du skal skille sanden fra valmuefrøene,» sa heksa.

«Rekker du det ikke til solnedgang, vrir jeg om halsen på deg!»



Wiilkii ayaa bilaabay hawshii, mid iyo midna ukala soo saaray iniinyihii ubaxa iyo ciiddii. Wuu shaqeeyey wuuna shaqeeyey, ilaa qorraxdu ku dhawaatay inay dhacdo.


"Weli wax badan ayaa hadhay," ayuu yidhi wiilkii isagoo isla hadlaya. "intaas in kabadan ma sameyn karo. Hadda ayey saaxiradii qoorta iga jebinaysaa!"


Gutten satte i gang. Han tok ett og ett av valmuefrøene ut fra sanda.

Han jobbet og jobbet, helt til sola begynte å gå ned. «Det er fortsatt masse igjen,» sa gutten sliten.

«Jeg klarer ikke mer. Nå kommer hekse til å vri om halsen på meg!"

Plutselig følte han noe som rørte på seg. Det var maurene som hadde kommet for å hjelpe ham!





Si kedis ah ayuu u dareemay wax farahiisa dushooda taabtay. Waxayna ahayd qudhaanjadii oo u timid inay caawiso! Qudhaanjadii waxay bilowday inay mirihii ka soocdo ciidda. kow, laba, iyo seddexna shaqadii waa la qabtay!

Maurene satte i gang og skilte valmuefrøene fra sanda. Og på én, to, og tre var jobben gjort!

Wiilkii wuxuu qaaday baaldi ay ka  
buuxaan iniinyihii, oo aan ciidi ku  
jirin. wuxuuna u cararay saaxiradii.  
"Hadda waad nasiib badnayd!"  
ayey tidhi saaxiradii iyada oo  
xanaaqsan.

Gutten tok med seg bøtta med  
valmuefrø, fri for sand, og løp til hekse.  
«Nå hadde du flaks!» sa hekse irritert.



Maalintii xigtay, ayey saaxiradii wiilkii kabo tolaha u dirtay hawl ka sii adag: "Furihii qolka amiiradda wuxuu ku dhacay webiga. Soo hel! Haddii aad ka gaadhsiinwaydo ilaa caawa, qoorta ayaan kaa jebinayaa!" ayey tidhi saaxiradii iyadoo aad u qoslaysa.

Dagen etter ga hekse Skomakergutten en enda vanskeligere oppgave:  
«Nøkkelen til rommet til prinsessa har falt ned i elven. Finn den! Rekker du det ikke til i kveld, vrir jeg om halsen på deg!» sa hekse mens hun lo høyt.






Wiilkii kabo toluhu wuxuu aaday wabiga  
wuxuuna bilaabay raadinta furaha.  
Laakiin wuxuu xusuustay inuusan  
dabaalan karin! “Maxaan sameeyaa  
hadda? sixiroolaydii ayaa qoorta iga  
jebin doonta, wiilkii ayaa yidhi markay  
qorraxdu sii dhacaysay.

Skomakergutten gikk til elven og begynte å  
lete etter nøkkelen. Men så kom han på at  
han ikke kunne svømme! «Hva skal jeg gjøre  
nå, heksa kommer til å vri om halsen på  
meg», sa gutten i det sola begynte å gå ned.



Si kedis ah ayaa dhawr dhibic oo biyo ah ay wejigiisa kaga soo daadatay. Wuxuu hoos u eegay wabiga.

Plutselig sprutet det noen vanndråper i ansiktet hans. Han så ned i elven.



Waxaa u yimid dhammaan kalluunkii dahabka ahaa! Si ay u caawiyaan.

Der var alle gullfiskene! De hadde kommet for å hjelpe ham.



Kalluunkii ayaa u dabaashay gunta, kana soo helay furihii oo lagu aasay hoosta bacaadka ah...

Fiskene svømte til bunnen og fant nøkkelen som var gravd ned i sandbunnen.



....Una dhiibay wiilkii.

De ga nøkkelen til gutten.

Wiilkii wuxuu ku orday saaxiradii  
wuxuuna ku yidhi "Furahii waan  
hayaa!" "hada waad nasiib badnayd".  
Ayey tidhi iyadoo xanaaqsan.

Gutten sprang bort til heksa og sa: «Jeg  
har nøkkelen!» «Nå hadde du flaks,» sa  
heksa enda mer irritert.




Intaas ka dibna waxay ku fadhiisteen  
xaaqinkii saaxiradda, waxayna u  
duuleen jaranjarada xageeda sare ee  
minaarada qasriga.

Så satte Skomakergutten og heksa seg  
på feiekosten til heksa og fløy opp trappa  
til slottstårnet.

De satte inn nøkkelen og åpnet døra  
til prinsessens kammer.



Furihii bay geliyeen oo waxay ku fureen albaabkii qolka amiiradda. Halkaas waxaa fadhiyay seddex haween ah oo ku daboolan xijaab dheer oo cad. dhamaantood way isku ekaayeen! "hadaad qiyaasto cidda ay tahay amiiraddu, waad guursan kartaa iyada." ayey yidhi saaxiradii. "Haddaad khalad ku qiyaasto, qoorta ayaan ku jebinayaa!"



Der satt det tre kvinner dekket med lange, hvite slør. Alle så like ut! «Hvis du gjetter hvem som er prinsessa, kan du gifte deg med henne. *Gjetter du feil, vrir jeg om halsen på deg!*» sa hekse «De ser jo helt like ut!» sa gutten. Nå kommer hekse til å vri om halsen på meg!»

"Way isku wada egyihiin!" ayuu yidhi wiilkii.  
Hadda ayey saaxiradii qoorta iga jebinaysaa!  
"Bzzzzzzzzzzzz" ayuu si lama filaan ah u maqlay.  
Kor ayuu eegay wuxuuna arkay in daaqada ay  
shinnidii hal hal uga soo gelayso. Ilaa ay  
dhamaantood soo wada galaeen.

«Bzzzzzzzzzzzz», hørte han plutselig.  
Han så opp, og inn gjennom vinduet fløy det inn bier, den  
ene etter den andre. Plutselig var alle biene der!



Shinnidii ayaa ku dul wareegtay mid ka mid ah saddexdii haween ee xijaabnaa. Waxayna si wada jir ah madaxa ugu sameeyeen taaj qurux badan oo dahabi ah. "Waa amiiraddii! Tan taajka dahab ahi madaxa ka saaranyahay! " ayuu yidhi wiilkii. Wuxuu farta ku fiiqay haweenaydii ay shinnidu madaxa kaga wareegaysay.

Biene svermet rundt en av de tre tilslørte kvinnene, og sammen formet de en vakker gullkrone over hodet hennes. «Det er prinsessa! Hun med gullkronen på!» sa gutten og pekte på hun som var omsvermet av biene.





Waxay iska saareen xijaabkii  
wejigga, waxaana soo baxday in  
wiilku si sax ah u qiyaasay. "waad  
nasiib badan tahay!", ayey tiri  
saaxiraddii iyadoo xanaaqsan.


Kvinnene fjernet ansiktsslørene  
sine, og det viste seg at gutten  
hadde gjettet riktig.



«Nå hadde du jammen meg flaks!»  
sa hekse sint og irritert.

Laakiin saaxiraddii way oofisay hadalkeedii. Wiilkii kabo toluhuna wuxuu guursaday amiiradii. Wuxuuna noqday boqorka dalka. Maalintaas wixii ka dambeeyayna, ma jirin kabo tole xanaaqsan ama saaxirad shar leh oo dhibaateynaysay. Sheekadiina sidaas bay ku dhamaatay.

Heksa holdt ord og Skomakergutten fikk gifte seg med prinsessa og ble konge i landet. Etter den dagen var det ingen sinte skomakere eller onde hekser som plaget dem lenger.

Snipp snapp snute, så var eventyret ute.





Finn flere fortellinger på

[nafo.oslomet.no](http://nafo.oslomet.no)

Fortellingen er laget med illustrasjoner fra Svetlana Voronkova